

# Adigu ma dhigan doontaa sfi?

Haddaba adigu waxaad u baahantahay in aad akhriso tan

## Waxaa wax laga baddalay xeerarkii waxbarashada waqtiga buuxa

Laga soo billaabo maalintu taariikhdu tahay 5 ta agoosto ee sannadka 2019 waxaa laydinku casuumayaa 25 saacadood oo waxbarasho ah halkii isbuucba, si aad usoo gaadhho waxbarasho waqti buuxa ah. Taasi macnaheedu waxa weeye in adigaagan sfi ga ku baranayaa fasalka dhexdiisa aad 15 saacadood isbuuciiba baranaysid, waxaad u baahantahay in aad waxbarashadaada ku dhamaystiri doontid toban saacadood oo kale oo aad dhiganaysid wax uun ah waxbarashada jiheeynta ee dadka waawayn ama koorso ah afka ingiriiska ama koorso xisaabta.

### Koorsooyinka jiheeynta waxbarashada dadka waawayn

Aqoonta Digitaalka (dhowr heerar)

Nolosha shaqada iyo suuqa shaqada ee gudaha Iswiidhan (dhowr heerar)

Hordhaca xagga afka ingiriiska, xisaabta, isgaarsiinta iyo ogaalada bulshada

Maaddooyinka cilmiga sayniska iyo xeesha daraaseeynta

Maaddooyinka cilmiga sayniska, sii wadasho

Maaddooyinka cilmiga bulshada iyo xeesha daraaseeynta

Maaddooyinka cilmiga bulshada, sii wadasho

**15 saacadood**  
**+ 10 saacadood**  
**= 25 saacadood**

### Sidee bay haddaba taasi u dhacaysaa?

Waxbarashada dadka waawayn waxay soo jeedinayaan in aad dalbo hal koorso oo ah kuwa jiheeynta sida afka ingiriiska iyo xisaabta. Deedna adigu waxaad dhiganaysaa sfi ga, waxaadna maalintii ku dhamaystiraysaa intan u dhaxeysa 09.00 - 16.00 (waxaa imaan kara is baddal).

### Muhiim!

Haddii aad adigu sabab uun u rabin in aad dhigato koorsooyinka jiheeynta ah, waa in aad soo buuxiisa fooka kala joojinta daraasadda oo aad deedna u dhiibtaa dugsiga aad dhigato. Kuna fikir inay saamaeeyn ku yeelan karto lacagta lagu siiyo.

Haddii aad adigu kala joogso hal koorso oo ka mid ah kuwa jiheeynta waxaa dhici karta in lacagtii kaaga imaan jirtay xafiiska xiriirka shaqaalaha iyo masaruuf ku taageeridda in ay yaraan doonto

Haddii aad adigu carruur leedahay oo ay dhigtaan xannaanada waxaa muhiim ah in aad u sheegto in waqtiga lagu haynayo lagu kordhiyo. Adigaagane leh carruurta dhigata dugsiyada ka fikira in aad malaha u baahantihiin inaad u sheegtaan qolyaha waqtiyada firaaqada waqtiyada dugsiga ka dib.

### Ogaallo dheeraad ah

Haddii aad adigu qabto wax su'aalo ah, la soo xidhiidh ama soo booqo xafiiska adeegga ee degmada Borlänge: 0243-740 00, [kommun@borlange.se](mailto:kommun@borlange.se), Röda vägen 50.

**WAXBARASHADA DADKA WAAWAYN**

